

Waa waqtigii aad dib-u-cusboonaysiin lahayd OHP-gaaga iyo macaashyada/dheefaha kale ee Medicaid.

Qaad tallaabo si aad u ilaashato macaashyadaada/dheefahaaga!



Ilaasho
faa'idooyinkaaga
caafimaadka!

Haddii aad haysato qorshaha kaarka caafimaadka ee lagu magacaabo Oregon Health Plan (OHP) ama macaashyada/dheefaha kale ee Medicaid, fadlan raac tallaabooyinka hoose. Haddii aad horey u helaysay macaashyadan/dheefahan waqti kasta intii lagu gudajiray safmareenka COVID-19, weli waad heli kartaa.

Tallaabada 1: Hubi inaad cinwaankaaga cusbooneysiiso. Adiga ayaa sidan samayn kara ama waxaad ku heli kartaa caawimaad bilaash ah mid ka mid ah qaababkan hoose:



Waxaad tagtaa xafiis ama bahwadaag qaabilsan arrimaha bulshada oo kuu dhow adigoo isticmaalaya barta Cinwaankeedu yahay [KeepCovered.Oregon.gov](https://www.KeepCovered.Oregon.gov).



Kasoo warbixi wixii isbadalo ah kadibna uga jawaab onlaynka farriimaha barta dib-u-cusbooneysiinta [Benefits.Oregon.gov](https://www.Benefits.Oregon.gov).



Wac lanbarka 800-699-9075
Marka aad cod maqasho, riix batoonka 5. Sug oo ha jarin laynka. Qof ayaa kugula hadli doona Af-Ingiriisi. Si tartiib ah ugu sheeg luqadda aad doorbidayso. Waxaa lagu wici doonaa turjubaan. Waqtiyada sugitaanku waa kuwa aad u gaaban inta u dhaxaysa saacadaha 7 subaxnimo iyo 8 subaxnimo.



Tallaabada 2: Mar-kasta ka hubi boostada waraaqaha dib-u-cusboonaysiinta ee lagu soo diro.
Markay kusoo gaaraan waraaqaha dib u cusboonaysiintu, isla markiiba samee waxyaabaha ku qoran.



Dirista Waraaqaha ayaa la bilaabay hadda ilaa laga gaarayo bartamaha sannadka 2024. Cid walba isku mar looma diri doono dib-u-cusboonaysiin. Inta badan boostadaada ka hubi waraaqaha ay kuusoo diraan gobolka Oregon.

[KeepCovered.Oregon.gov](https://www.KeepCovered.Oregon.gov)

Waraaqaha dib-u-cusbooneysiintaada waxay kuu sheegi doonaan waxyaabaha ay tahay inaad samayso.

Waxaad heli doontaa waraaqaha dib-u-cusboonaysiinta iyo warbixinnada kooban ee la xiriira kiisaska, kuwaasoo sharraxaya macaashyadaada. Si taxaddar leh u akhri warbixinta kooban ee xubin kasta oo qoyskaaga ka mid ah. Nala soo xiriir adigoo isticmaalaya mid ka mid ah dhigaalada ku xusan Tallaabada 1-aad haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo inaad fahamto.

Warqadahaaga waxay kuu sheegi karaan waxyaabo ay ka mid yihiin:



AMA

In si toos ah dib loo cusbooneysiiday macaashka/dheefaha qorshaha caafimaadka ee OHP ama macaashyada kale ee Medicaid. Dib-u-eeg macluumaadka si aad u hubiso in wax walba ay sax yihiin. Noosoo sheeg haddii ay wax iska kaa beddeleen.



Waa inaad noo soo gudbisaa macluumaad dheeraad ah si aad u ogaato inaad weli macaashyada/dheefaha u-qalanto. Waxaa laga yaabaa in lagu sheego inaad soo dirto macluumaad ama wareysi lagula yeesho. Waxaad haystaa ilaa 90 maalmood si aad jawaab u bixiso. Waraaquhu waxay kuu shariixi doonaan waxyaabaha ay tahay inaad samayso.

AMA

Macaashka/dheefta qorshaha OHP ama macaashyada/dheefaha kale ee Medicaid waxaa ku yimid isbeddel, ama hadda uma qalantid. Haddii ay tani dhacdo, waxaad heli doontaa ogeysiis 60 maalmood ah kahor inta aysan macaashyadu kaa dhamaanin. Waxaan kuusoo diri doonaa macluumaad ku saabsan xulashooyinka kale ee caymiska caafimaadka.

Haddii dib dambe adiga ama xubin ka mid ah qoyskaaga ugu qalmi waayo qorshaha Oregon Health Plan (OHP) ama macaashyada/dheefaha kale ee Medicaid:

Waxaa laga yaabaa inaad u-qalanto Medicare. Ka wac Social Security Administration lambarka 800-772-1213 si aad isaga diiwaangeliso telefoonka ama aad ballan uga qabsato xafiiska deegaanka maxalliga. Waxaad isku diiwaangelin kartaa Medicare adigoo adeegsanaya barta onlaynka ah ee Cinwaankeedu yahay ssa.gov/medicare/sign-up. Ama waxaad booqan kartaa barta Cinwaankeedu yahay OregonHealthcare.gov/GetHelp si aad u hesho wakiil caymis ama qof kaa caawiya barnaamijka Senior Health Insurance Benefits Assistance Program. Waxay kaa caawin karaan inaad go'aansato xulashooyinka Medicare ee aad hali karto.

Haddii aadan u-qalmin Medicare, hubi si aad u ogaato in loo-shaqeeyahaagu bixiyo qorshe la awoodi karo. Hubso inaad la hadasho maamulahaaga ama waaxda shaqaalaha ka hor inta uusan kaa dhammaan qorshahaaga OHP. Waxaad heli doontaa waqti isdiwaangelin oo gaar ah marka OHP-ga. Lagaa joojiyo

Haddii aadan haysan Medicare ama qorshe shaqo-bixiye oo la awoodi karo, **waxaa laga yaabaa inaad ka iibsan karto qorshe caafimaad suuqa Caymiska Caafimaadka Oregon** adigoo bixinaya lacag yar oo ka bilaabmayso \$1 doolar bishii. Dadka lumiyay OHP-ga waa inay is-diiwaangeliyaan kahor inta uusan dhammaan qorshahaaga OHP, balse waxaad haysataa ilaa 31-da Luulyo, 2024, si aad isku diiwaangeliso. Qorshayaashu waxay daboolayaan waxyaabaha ay ka midka yihiin daawooyinka dhakhtarku qoro, booqashooyinka dhakhtarka, daryeelka degdegga ah, isbitaal dhigista, iyo waxyaabo kale oo badan. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo barta Cinwaankeedu yahay OregonHealthCare.gov ama wac 1-833-699-6850 (lambarka si lacag la'aan ah loo waco, wicitaannada gudbinta oo dhan waa la qabtaa). Waxaad sidoo kale u booqan kartaa bahwadaagta qaabbilsan arrimaha bulshada ama wakiilka caymiska si bilaash ah, caawimaad fool-ka-fool ah. Si aad u hesho midka kuugu dhow, fadlan booqo OregonHealthCare.gov/GetHelp.



Oregon
Health
Authority

Oregon Department
of Human Services

Oregon
**HEALTH
PLAN**

OREGON
HEALTHCARE.gov

KeepCovered.Oregon.gov

Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, waxaan bixin karnaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhooleyasha. La xiriir lambarka 503-945-5488 (wicitaanada gudbinta ah oo dhan waa la qabtaa) ama booqo barta Cinwaankeedu yahay feedback@odhsoha.oregon.gov.

FS-G-SO (06/21/2023)